

# Nagu soo biir sida La-taliyaha Qoyska ahaan ee Waaxda Caafimaadka Maskaxda ee Seattle Children's Hospital

"Inaan noqdo La-Taliyaha Qoyska waxay i siisay fursad aan ugu hadlo qoysaska kale, gaar ahaan kuwa leh carruurta yaryar ee la tacaalayo cudurada maskaxda. Waxaan ku faraxsanahay sida fikradahayga loo maqlo iyo taageerada bixiyeyaasha Caafimaadka Maskaxda oo ka hadlay mawduucan bulshadayada dhexdeeda. Heerka ay SCH ka go'an tahay inay maalin kasta bixiyaan iyo inay wanaajiyaan adeegyada iyadoo lagu saleynayo baahiyaha qoyska waa mid aad u wanaagsan oo aan hadal lagu soo koobi karin." - Maria B.

"Inaan noqdo La-Taliyaha Qoyska waxay ii ahayd fursad wanaagsan oo aan bukaanka iyo qoyska ku siiyo aragti ku saabsan waxyaabaha aan u arko inay muhiim yihiin - tayada iyo helida daryeelka habdhaqanka caafimaadka. Markasta oo ay waaliidinta kaqaybqaadanayo bataan, waxaa si fiican u muuqaanayo sida daryeelku uga turjumayo baahiyada bulshada." - Karma K.



## Siyaabaha looga qaybqaato:

### Guddiga La-talinta Qoyska ee Caafimaadka Maskaxda

- Kulamada Guddiga ee Khadka ah
- Talaadada 3<sup>aad</sup>, 06:00 - 08:00 galabnimo
- Sibteembar – Maayo
- Adeegyada Turjubaanka ayaa la bixiyay, hadba sidii loogu baahday
- Kaqaybqaado dadaallada horumarinta tayada waaxda, hadba sidii loogu baahday

### La-taliyaha Qoyska ee Guud

- Kor ugu kac oo kamid noqo Guddiga / ama hoos ugu deg Guddiga oo kaga qaybqaado heer hoose
- Hel warbixinada waaxda ee iimaylka lagu bixiyo bil kasta
- Fursadaha looga qaybqaadanayo dadaallada horumarinta tayada waaxda, hadba sidii loogu baahday

### Sida la isku soo gudbiyo ama loo soo gudbiyo dadka kale:

Fadlan la xiriiir [PFAB@seattlechildrens.org](mailto:PFAB@seattlechildrens.org)

## Hadafka La-taliyaha Qoyska ee Caafimaadka Maskaxda

Waxaan aaminsanahay in haysashada qoysaska sida xubno koox ahaan ay muhiim u tahay bixinta daryeelka iyo adeegga ugu fiican. Qoysaska wadaaga aragtidooda waxay na baraan sida run ahaantii ay waxyaabaha u shaqeeyaan; way na dhiirrigeliyaan waxayna na siiyaan awood; waxay nala socodsiiyaan naguna xirayaan bulshada.

## Ujeedooyinka La-taliyaha Qoyska ee Caafimaadka Maskaxda waa inuu:

- Matalo qoysaska kala duwan ee looga adeegay dhammaan Waaxda Caafimaadka Maskaxda
- Bixiyo tallooyin ku saabsan dadaallada lagu taageerayo ujeedooyinka istiraatiijiyadeed ee waaxda
- Ka hadlo arimaha oo uu wadaago walaacyada si loo wanaajiyo daryeelka iyo adeegga
- Aqoonsado shaqada iyo mashaariicda cusub ee taageerayo daryeelka qoyska ku saleysan

## Bayaanka Kahortagga Cunsuriyada ee Waaxda Caafimaadka Maskaxda

Waaxda Caafimaadka Maskaxda waxaa ka go'an inay noqoto mid Kahortagta Cunsuriyada iyada oo u marayso isbedel siyaasadeed iyo ficil oona hirgelinayso siyaasadaha kahortagga cunsuriyada kuwaasi oo jawi badqab ah, taageero leh, loona siman yahay siiya bukaanadayada, qoysaska, iyo shaqaalahayaga Madow, Dhaladka ah, ama ah Latina/x/o, iyo inay adeegyada daryeelka caafimaadka maskaxda oo loo siman yahay ka bixiso dhammaan waaxdayna.